

Sida Loo Xareeyo Is Furitaanka ama Kala Tagga Sharciga ah

Yaa loogu talo geley tan?

Hadii aad doonayso is furitaan ama kala tag sharci oo xaaskaaga ama cidda aad wada nooshihiin ah:

- Dhinac waa inuu deganaa Colorado ugu yaraan **91 maalmood** kahor inta aanu xaraynin.
- Hadii aad caruur leedahay, waa inay degan tahay Colorado ugu yaraan **182 maalmood** ama ilaa markii ay dhasheen hadii uu ka yar yahay lix bilood jir.
- Fadlan u sheeg maxkamada hadii aad u baahan tahay turjumaan.

Ma jirtaa mudo la sugayaayi?



Haa. Xataa hadii adiga iyo xaaskaaga aad ku heshiisaan dhamaan arrimaha. Waa inaad weli sugtaa **91 maalmood** kadib marka aad xarayso Dacwada ee aad lamaanaha kale gaadhsiiso.

91 maalmood waxay bilaabmaysaa marka codsiga la wada xareeyo, ama qofka kale la gaadhsiiyo ama uu saxeeexo ka tanaasulka.

Miyaan heli karnaa kaalmo aanu ku xalinayno murankeena?

Xafiiska Gobolka ee Xalinta Khilaafaadka ayaa ka caawiya lamaanaha inay isku dayaan inay ku heshiiyaan arrimaha ay ku muransan yihiin. www.ColoradoODR.org

Miyaan is bedeli karaa oo ka noqon karaa is furitaanka?

Haa. Laakiin hadii aad ka noqoto oo labada dhinacba doonayaan inay joojiyaan is furitaanka, u sheeg maxkamada **isla markaba**. Hadii aydaan sidaa samaynin, markaa si toos ah ayaa la idiin kala furi karaa! Si aad noogu sheegto, buuxi oo xaree foomka JDF 1305 - *Dalabka Lagu Sharaxayo Joojinta*.

Ma in aan looyar qabsadaa?



Khasab *kuguma* aha inaad qabsato looyar, laakiin waa inaad raacdaa shuruuc iyo nidaamyo lamid ah kuwa uu raaco looyarku. Waxa aad la xidhiidhi kartaa looyar wakhti kasta.

Ma jiraan shuruuc ay tahay in la raaco?

Haa. Marka Dacwada la xareeyo, labada lamaanee waa inay ku dhaqmaan amarka kumeel gaadhka ah ee maxkamada:

- HA iibin, gudbin, cid kale ku qorin, dayn ku qaadan, qarar, ama meesha ha ka saarin wixii hantida alaabta guurka ah bilaa ogolaanshaha lamaanaha kale ama maxkamada. Waxa aad u isticmaali kartaa dakhligaaga kharashakaadka ganacsiga caadiga ah iyo wixii daruuriyaadkaaga nolosha ee caadiga ah.
- HA wareerin nabada lamaanaha kale.
- HA burin, joojin bixinta lacagta, ama isbedel ha ku samaynin caafimaadka, siyaasadaha mulkiilaha guriga, kiraystaha, gaadhiga, ama caymiska nolosha ee dhinac ku jira kiiskan ama ku magacaaban dhinac manfacade ahaan. *Ka reebban:* Waxa aad isbedel ku samayn kartaa caymiska hadii aad haysato ogolaanshe qoraal ah oo dhinaca kale ah ama amarka maxkamada, oo aad siiso ugu yaraan 14 maalmood oo Wargelin ah oo dhinac kale ah. (§§ 14-10-107; 14-10-108, C.R.S.)



Amarada maxkamada waa in loo hogaansamaa.

Macluumaadka ku yaala boggan waa macluumaad sharci ah.

Wixii talo sharci ah, la hadal looyar.



Wixii qaabilaada laxaad la'aanta ah la xidhiidh maxkamada deegaankaaga.

Foomamka la Xaraynayo

① Buuxi foomamka maxkamada



Hadii adiga iyo lammaanahaagu aad saxeexdaan codsiga, markaa nidaamku wuu fududaanayaa.

Buuxiya foomamkan:

- JDF 1000 Xaashida Macluumaadka Kiiska.
- JDF 1011 Dacwad.
- JDF 1012 Yeedhmo. (ka bood hadii aad wada saxeexdeen dacwada)

Halkee ayaan ka heleyaa foomamka maxkamada?

Tag: www.courts.state.co.us/Forms/family

Hayso nuqul dhamaan foomamka aad ku xarayso maxkamada si aad u tixraaco.

② Xaree Foomamkaaga

- Ku xaree onleyn ahaan www.jbits.courts.state.co.us/efiling.
- Ama, ku xaree foomamka buuxa Karaaniga Maxkamada ee degmada adiga ama lammaanahaagu aad degan tihiin.
- Bixi kharashka lagu xaraynayo.
- Hadii aanad awoodin kharaska, sidoo kale xaree:
 - JDF 205 – Dacwada, iyo
 - JDF 206 – Amarka (*Kaliya qoraalka*)
- Waxaa lagu mudayn doonaa Shir Xaaladda Hore ah 42 maalmood gudahood marka aad xarayso.
- Amarada Nidaamka ayaa adiga lagu siin doonaa ama boosta ayaa lagugu soo diri doonaa oo waxay ku xidhan tahay nidaamka maxkamada deegaanka.



③ Gaarsiin

- Ka bood talaabada hadii aad wada saxeexdeen dacwada.
- Naqdi JDF 1099 sida aad ugu gaynayso lamaanahaaga.

④ Jawaab

- Ka bood talaabada hadii aad wada saxeexdeen dacwada.
- Foomka waxa jawaab-bixiyuhu uu samaynayo JDF 1015 – Jawaab.
- Eeg Talaabada 2 ee xaraynta.
- Ku gaadhsiinta elektorooniga ah ama nuqulka boosta ee Dacwoodaha.

⑤ Buuxi oo Xaree foomamkan:

Digniinta Mudada Ay Ku Eeg Tahay!

42 maalmood gudahood kadib marka uu xareeyo ama uu helo Codsiga, lammaane kastaa waa inuu xareeyaa:

- JDF 1111 Bayaanka Dhaarta Dhaqaale
- JDF 1104 Shahaadada U Hogaansanka

Foomamka Kale ee la Xaraynayo:

- JDF 1115 Heshiiska Hantida iyo Dhaqaalaha

Foomkan waxa uu tusayaa maxkamada sida adiga aad u qorshaynayso inaad u kala qaybsataan hantida oo aad u wadaysaan biilka lammaanaha kale bixiyaan (hadii uu jiro).

Dhinacyadu waa inay gudbiyaan hal waraaq oo ay wada saxeexeen. Hadii aad ku heshiin waydaan, dhexdhexaadin ayaa la amri karaa.

- JDF 1117 Amarka Biilka (*Kaliya qoraal*)

- JDF 1019 Wareegtada (*Kaliya qoraal*)

Kani waa amarkii ugu danbeeyay. Marka ay maxkamadu saxeexdo, is furi taanku wuu fulay.

Hadii aad leedahay caruur, sidoo kale xaree:

- JDF 1113 Qorshaha Waalidnimada

Dhinacyadu waa inay gudbiyaan hal waraaq oo ay wada saxeexeen. Hadii aad ku heshiin waydaan, dhexdhexaadin ayaa la amri karaa.

- Xaashida Shaqada Biilka Ilmaha

Xisaabinta Biilka Ilmaha waxaa laga heleyaa:

www.courts.state.co.us/Forms/family

Hadii aanad lahayn caruur, waxa aad xarayn kartaa:

- JDF 1018 Wareegtada Bilaa Imaatinka

Waraaqahani waxay sheegayaan in la gaadhay heshiis buuxa, oo dhagaysi aan loo baahnayn. Dhinacyadu waa inay gudbiyaan hal waraaq oo ay wada saxeexeen.

⑥ Dhagaysiga Maxkamada



Waxaa jiri doona dhagaysi maxkamadeed hadii heshiis aan la gaadhin.